



SABABTA KA QAYB QAADASHADA IMTIXAANKA GOBOLKU MUHIIMKA UGU YAHAY QOYSASKA

Sidee Bay Qaadashada Imtixaanaadka Gobolku U Caawiyaan Ilmahayga?

- Wuxuu bixiyaa macluumaad ku saabsan waxbarashada ilmahaaga ee ku aadan xirfadda Luqadda Ingiriisiga, xisaabta, iyo heerarka sayniska oo aad dib u eegis ku sameyn karto macluumaadka kale ee ka socda dugsiga oo aad weydiiso su'aalo haddii loo baahdo.
- Wuxuu ku siinayaa fursad aad ku hubiso horumarka ilmahaaga ee ku aadan buuxinta qaar ka mid ah xirfadaha looga baahan yahay kulliyadda iyo/ama xirfada shaqo.
- Wuxuu adiga iyo qoysaska kale ee ka tirsan bulshadaada siiyaa macluumaad ku saabsan sida dugsiyada degaanku u buuxinayaan baahiyaha ardayda oo dhan.

Sidee Bay Qaadashada Imtixaanaadka Gobolku U Caawiyaan Dugsiga Ilmahayga?

- Wuxuu bixiyaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan sida wanaagsan ee dhammaan ardayda ka tirsan dugsiga ilmahaagu ay wax u qabanayaan ee ku saabsan barashada xirfadda Luqadda Ingiriisiga, xisaabta, iyo heerarka sayniska, si dugsiga si sinnaan leh loogu taageeri karo kaalmo iyo ilo.

Ma ogeyd?

Xeerka arday Kastaa In Uu Guulaysto 'Every Student Succeeds Act' (ESSA)—sharciga federaalka ee lagu maamulo waxbarashada guud ee dugsiyada dadweynaha ee guud ahaan dalka—ayaa la ansixiyay 2015-kii wuxuuna **farayaa** imtixaan gobolka oo dhan ee darajooyin iyo maadooyin gaar ah.

Iyada oo sababtu tahay ardayda oo **dhan** oo qaata imtixaan isku mid ah, dugsiyada iyo macallimiintu waxay ka fikiri karaan ardayda oo **dhan** marka ay wax qorsheynayaan.

Waqti aan sidaa u fogayn, ardayda qaarkood **kuma aysan jirin** imtixaanka, sida ardayda qabta naafanimada iyo ardayda federaal ahaan loo aqoonsaday in ay yihiin Bartayaasha Ingiriiska.

- Wuxuu ka caawiyaa in la aqoonsado awoodaha nidaamka iyo meelaha looga baahan yahay kobac waqtga oo dhan si loo qiimeeyo manhajka, waxbarashada, iyo qiimeynta kale ee lagu dhaqmo.

Sidee Bay Tahay In Natiijooyinka Imtixaanka Ilmahayga Loo Isticmaalo?

- Xusuusnow in **tayada dugsigu ay ka badan tahay wadarta natiijooyinka imtixaankeeda**. Iska ilaalinta xukunka ama go'aanada kaliya lagu saleynayo natiijooyinka imtixaanka gobolka.
- **Ka dhigida natiijooyinka imtixaanka gobolka qayb ka mid ah wada hadalada ku saabsan waxbarashada ilmahaaga**. Raadinta in uu waafaqsan yahay macluumaadka kale ee ku saabsan waxbarashada ilmahaaga ee laga helo macallinkiisa ama dugsigiisa. Weydiinta su'aalo haddii macluumaadku uusan ahayn mid is waafaqsan.
- Go'aanada ku saabsan fursadaha ilmahaaga –sida dariiqooyin xisaabeed oo adag, Meelaynta Horumarsan, Shahaadada Caalamiga ah, ama barnaamijyada dadka Xirfadda iyo Hibada leh) waa in ay noqdaan kuwo ku saleysan **ilo badan oo caddeyn ah**, maaha natiijooyinka imtixaanka gobolka oo kaliya.

LA XIRIIR



[Bogga Internet-ka ee Kooxda Qiimeynta ODE](#)

Fadlan wixii su'aalo ah, faallooyin ah, ama talooyinka u soo dir:

ODE.AssessmentTeam@ode.oregon.gov

Xogta imtixaanka ardayga waxay gacan ka geysataa **kordhinta fahamkeena** ee sida wanaagsan ee aanu wax u barayno una taageerayno ardaydeena.

Imtixaanka gobolku wuxuu muuqaal guud ka bixiyaa sida **nidaamka dugsiga oo dhan** uu wax u qabanayo marka la eego meelaha muhiimka ah. Tani waxay gacan ka geysataa go'aanada wanaajin doona waxbarashada wuxuuna ilo iyo taageero diirada la saarayo siiyaa dugsiiyo kala duwan.

Natijiinta imtixaanaadka gobolku waxay gacan ka geystaan in la aqoonsado isbeddelada dhanka waxbarashada. Tani si gaar ah ayay muhiim u tahay haddii **kooxaha ardayda ah**, sida ardayda qabta naafanimada iyo ardayda federaal ahaan loo aqoonsaday in ay yihiin Bartayaasha Ingiriiska, ay yihiin kuwa aan si fiican adeega u helin.

Ilaha Qiimeynta ODE

[Qiimeynta Saxda ee loogu talagalay Ujeedada Saxda](#)

[Koorsooyinka Tababarka ee Qiimeynta Waalidka ee Akhriska/Qoraalka](#)



Xarunta Qaranka ee Natiijooyinka Waxbarasho
www.nceo.info

NCEO waxaa lagu taageeraa heshiis iskaashi (H326G160001) oo ka dhexeeya University of Minnesota, Xarunta Qaranka ee Natiijooyinka Waxbarasho (NCEO) (#H326G160001) iyo Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka, Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada Baxnaaninta (OSERS), Xafiiska Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah. Waxyaabahani kama turjumayaan mowqifka ama siyaasadda Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka ama Xafiisyada ku dhex yaal. Mas'uulka Mashruuca David Egnor